



# Daaweynta iyo Kaydinta Dhawrsoon ee Biyaha Aqalka/ Guriga ee Xaaladaha Degdega ah

Buugga hagaha shaqaalaha iyo mutadawaciinta Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas gacanta ku haya



# Qorshe-hawleedka Shaqo ee IFRC (2006-2010)

Labada sano ee soo socda, shaqo wadareedka u qorshaysan Federationka waxay noqon doontaa guul ka gaadhista ujeedooyinkan iyo mudnaanadan hoos ku xusan:

## Ujeeddooyinkeena

**Ujeedada 1:** Yaraynta tirada dhimashada, dhaawaca iyo saamaynta masiibooyinka.

**Ujeedada 2:** Yaraynta tirada dhimashada, bukaanada iyo saamaynta xanuunada iyo gurmada caafimaadka bulshada.

**Ujeedada 3:** Kor u qaadista awoodaha bulshada rayidka ah, Urur Qarameedyo Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas iyo Laanqayraha Cas si ay ula macaamilaan xaaladaha degdega ah ee nuglaanta.

**Ujeedada 4:** In la horumariyo xishmaynta kala duwanaanshaha dadka iyo sharafta bani'aadamka isla markaasna la yareeyo jidh-diidka, takoorka iyo faquuqa bulshada dhexdeeda.

## Mudnaanadeena

In aanu horumarino awoodaheena heer dal, gobol iyo caalamiba si aanu uga jawaab bixino masiibooyinka iyo xaaladaha degdega ah ee caafimaadka bulshada.

Dardargalinta awoodaheena ku aadan kor u qaadista caafimaadka bulshooyinka nugul, ka hortagga xanuunada iyo dhimista khatarta masiibada.

In si weyn kor loogu qaado barnaamijyada iyo wacyigalinta aanu ka samayno HIV/AIDS.

In aanu dib u cusboonaysiino wacyigalinta mudnaanada hawlaha samafal, gaar ahaan dagaalka la Xiriirka jidh-diidka, faquuqa iyo takoorka iyo weliba horumarinta dhimista khatarta masiibada.

© Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas

*Lama ogola in wax dhalan-gadis ah lagu sameeyo qayb kasta oo ka mid ah buugan hadday tahay magaca oo laga bedelo, in la koobi gareeyo, ama lagu turjumo luqad kale amaba lagu dabaqo baahiyaha degaan iyadoo aan wax ogolaanshiyo ah laga haysan Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas.*

## Diidmo sharci

Maadaama dhokumantigan loogu talagalay in uu noqdo guud ahaan buuga daaweynta biyaha qoyska iyo kaydintooda, waxa lagu soo bandhigay astaamaha iyo daawooyinka lagu isticmaalo xaaladaha degdega ah ee waqtigaas taagan. Daawooyinka iyo agabyada kale ee lagu xusay buugan ma aha mid u gaar ah ama uu dhiirigalinayo Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas iyo Laanqayraha Cas, waa ay isbedeli karaan waana laga guuri karaa.

*Sawirka Jaldiga:* IFRC

*Waxa mahadnaq aanu u soo jeedinaynaa intii ka qayb qaadatay buugan ee suurtogalisay.*

*Waxaanu si gaar ah ugu mahad celinaynaa Gulled Hassan Elmi oo buugan luqadda Af-Somaliga ku turjumay.*

## 2013

Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas

P.O.Box 41275  
Nairobi, Kenya  
Telephone: +254 20 2835000  
Telefax: +254 20 2712 777  
E-mail: regional.eastafrica@ifrc.org  
Web site: www.ifrc.org

# >Tasmada Buugga

<b>Tayada Biyaha Guud Ahaan</b> _____	2
<b>Barashada Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Kaydinta Dhawrsoon</b> _____	4
<b>Qaababka Daaweynta Biyaha Aqalkaa</b> _____	6
Shaandhaynta _____	6
<b>Jeermis-ka-dilis</b> _____	7
Karinta	8
Jeermis-ka-dilista Cadceeda	10
Jeermis-ka-dilista Kimikada	12
<b>Kala-fadhiisinta</b> _____	15
Qaabka saddexda Dhari	16
Kimikada Kala-Fadhiisinta	18
<b>Biyo-Safaynta</b> _____	20
Safeeyaha Shamaca	20
Safaynta Biyaha ee Ciid-Bataaxda	21
<b>Kaydinta Dhawrsoon iyo Ilaalinta</b> _____	22
<b>Kor u Qaadista Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Kaydintooda</b> _____	24
<b>Geedka go'aanka daaweynta biyaha aqalka iyo kaydintooda</b> _____	27
<b>Waraaqaha xogta</b> _____	30
Qaabka saddexda Dhari	30
Sida loogu daweeyo biyaha Biyo Ilaaliyaha (WaterGuard)	32
Sida loogu daweeyo biyaha Kiniinka Koloriin	34
Sida loogu daweeyo biyaha Watermaker	38
Sida loogu daweeyo biyaha PUR	38
<b>Agabyada dheeraadka ah</b> _____	40



# >Tayada Biyaha Guud Ahaan

## >Maxay Tayada Biyuhu Muhiim u tahay?

Biyo nadiif ahi waa sababta kaliya ee aasaaska u ah caafimaad qabka dadka, gaar ahaan marka lagu jiro xaaladaha degdega ah.

## >Sidee ayay Biyuhu ku Wasakhoobaan?

Biyuhu waxay ku wasakhoobi karaan goobta laga soo dhaaminayo, aqalka, ama inta aqalka lagu soo wado.

Goobta biyaha ee aan la ilaalin, weelka aan nadiifta ahayn, ama gacmaha aan la maydhin si fudud ayay biyaha u bedeli karaan, xataa biyaha oo muuqaalkooda iyo dhadhankooduba fiican yahay ayaa waxa laga heli karaa waxyaabo ay dadku ku bukoon karaan.

Goobta biyuhu waxay ku wasakhoobi kartaa siyaabo dhawr ah oo ay ka mid yihiin:

- Liigitaan ama dilaac ku yimaada meesha qashinka lagu ururiyo iyo suuliga.
- Gacamada ay biyuhu u soo maraan ceelka iyo balliga oo wasakhaysan.
- Gacmo aan nadiif ahayn iyo weel wasakhaysan oo biyaha lagu dhaamiyo.
- Dadka iyo xoolaha oo goob ka wada caba.
- Waxyaabo dusha ceelka kaga dhaca.

Si kastaba ha ahaatee, goobta biyuhu waa marxladda koowaad ee meertada biyuhu ay maraan laga soo bilaabo ceelka ilaa aqalka. Xataa iyadoo goobta biyaha laga soo dhaamiyay ay nadiif ahayd haddana biyuhu way wasakhoobi karaan nadaafad darro awgeed:

- Iyadoo biyaha lagu soo dhaamiyay weel wasakhaysan.
- Iyadoo biyaha lagu kaydiyay weel wasakhaysan ama dul furan
- Iyadoo biyaha lagu dhaamiyay gacmo aan nadiif ahayn ama aqalka dhexdiisa weel wasakhaysan lagu shubo.



Tallaabo kasta oo silsiladan ka mid ahi waxay ina tusinaysaa fursad ay biyuhu ku wasakhoobi karaan

## >Waa Maxay Tallaabooyinka loo baahan yahay ee Tayada Biyaha?

Waxa jira sababo dhawr ah oo aynu ku horumarin karno tayada biyaha. Ta ugu muhiimsani waa iyadoo laga saaro ili-ma-aragtayda yaryar sida jeermiska iyo dulinka kuwaasoo sababa xanuunada. Sidoo kale waa in aynu iyana ka saarnaa walxaha wasakhda ah ee bedelaya urta iyo dhadhanka biyaha kuwaasoo qaada jeermiska xanuun keena ee ay dadku ku bukoodaan.

## >Waa Maxay Tallaabooyinka Tayada Biyaha ee aan lagaga hadal Buugan?

Biyuhu caafimaadka halis ayay galin karaan haddii ay ku jiraan walxaha ay ka midka yihiin (pesticides) oo ah daawooyinka cayayaanka ee beeraha lagu isticmaalo iyo weliba sunta kale ee sida caadiga ah dadku u adeegsado. Marka laga hadlayo Iron, wax dhib ah ma laha, laakiinse dhadhankeeda ayaa aad u xun, sidaas awgeed, waxay ku kalifaa dadka in ay raadsaan biyo ka dhadhan fiican, taasoo sababta in ay cabaan biyo wasakhaysan kadibna ay ku xanuunsadaan.

## >Sidaan ku Ogaan karnaa in Biyuhu Wasakhaysan yihiin?

Waxa jira dariiqooyin badan oo lagu hubiyo tayada biyaha. Dhammaantoodna waxay u baahan yihiin qalab iyo kimikooyin. Hubinta tayada biyaha lagagama hadal buugan. Xog badan oo la xidhiidha arrintaas waxa laga heli karaa agabyada dheeraadka ee mawduucan khuseeya.

Haddii hubinta tayada biyuhu aanay suurtoagal ahayn, waxa khataraha caafimaad lagu ogaan karaa goobta biyaha laga helo iyo habdhaqanka guud ee dadka isticmaalaya biyaha.

		Haa	Maya
1	Dadku biyaha ma waxay ka dhaansadaan bam (daba-lula) mise qasabad/rubineeto kor u taagan?		
2	Bamka Biyaha xaaladiisu ma fiican tahay?		
3	Biyuhu ma u muuqdaan qaar nadiif ah?		
4	Bamka Biyaha heerhiisu nadiif ma tahay?		
5	Dadku biyaha si dhawrsoon ma u keydsadaan?		
6	Dadku ma sameeyaan fayadhawr wanaagsan?		

Haddii jawaabta su'aalahaani ay yihiin MAYA, waxa jira in si xoogan ay ugu muuqato in ay dhibaato ka jirto tayada biyaha.

Xaaladaha degdega ah, dadku waxay aad ugu nugul yihiin jeermiska xanuunka dhaliya. Haddii ay jiraan khayraad ku filan, door fiican ayay ka ciyaari kartaa ku kaalmaynta kooxaha nugul in ay helaan biyo nadiifa si loo yareeyo khatarta xanuuno dilaaca.

# > Barashada Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Kaydinta Dhowrsoon

## > Waa Maxay Daaweynta Biyaha Aqalku?

Daaweynta Biyaha Aqalku waa shaqo lagu horumarinayo tayada biyaha ee heer aqal.

## > Waa Maxay Kaydinta Dhowrsoon ee Biyuhu?

Kaydinta dhowrsoon ee biyuhu waa isticmaalka weel nadiif ah oo leh daboolo IYO samaynta habdhaqanka suuban ee fayadhawrka, kaasoo ka hortagaya wasakhawga biyaha marka la dhaaminayo, qaadistooda iyo kaydintooda aqalka dhexdiisa.

## > Maxaynu kor ugu qaadi waynay Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Kaydinta Dhowrsoon?



Sawirada waxaa iska leh IFRC

Mar kasta waxa wanaagsan in biyaha aad isticmaalaysaa ay noqdaan kuwo ka yimid meel nadiif oo si dhowrsoon loo kaydiyay. Si kastaba ha ahaatee, tani ma aha mid mar kasta suurtoagal ah, gaar ahaan marka lagu sugan yahay xaaladaha degdega ah. Goobta biyaha waxbaa ka dhigi kara in aanay nadiif noqon ama aan la isticmaali karin. Ama dadku ma heli karaan weel nadiif ah ama maba sameeyaan habdhaqanka wanaagsan ee fayadhawrka.

Habka kaliya ee dhibaatan lagaga hortagi karaa waa iyada oo la daaweeyo biyah marka aqalka la keeno. Tani waa cabirka kaliya ee ku meel gaadh ahaan loo qaato inta laga horumarinayo goobta biyaha hadday tahay ceel ama bali. Qaababka daaweynta biyaha aqalka waxa samayn kara qof kasta oo ka mid ah qoyska kadib marka uu qaato tababar yar oo kooban.

*Dedaalada lagu horumarinayo tayada biyaha waxay saamayn weyn ku yeelan karaan caafimaadka waxaanay gaadhi karaan dadweyne aad u fara badan waqti yar gudahood.*

## > Sidee loo Sameeyaa Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Kaydinta Dhowrsoon?

Buugani wuxuu sheegayaa dhawr qaab oo biyaha lagu daaweeyo, waxaana ka mid ah tilmaamaha habka isticmaalkooda.

Waxa aad u muhiim ah in dadka u hela iyadoo qayb ka ah tababarada ka hortagga xaaladaha degdega ah ay garanayaan isticmaalkooda. Waxa jira qaabab kala duwan iyo waxyaabo kala duwan oo biyaha lagu daaweeyo kuwaasoo cabirkoodu kala gedisan yahay. Waa in aad aqoon u lahaataa waxa aad wax ku daweynayso ka hor inta aanad qaybin. *Adigu shakhsi ahaan u samee.* Hubina in aanu qofna helin ilaa la baro habka uu u isticmaalayo.

Iskuxidh iyo weliba isdhexgal dhaw oo dhex mara kooxda qaybinta ayaa waxa ay si gaar ah ahmiyad ugu leedahay qiimaha aadka u sarreeya ee walxahani ay ku taagan yihiin iyo khatarta la xidhiidha cabitaanka biyo wasakhaysan.

Buugan waxa kale oo ku jira tilmaamo aasaasi ah oo ku saabsan sida loogu xidhayo qaybinta walxahan marka lagu gudajiro xaaladaha degdega ah ilaa heerka kor u qaadida shaqaada fayadhawrka ee daaweynta biyaha aqalka iyo kaydinta dhawrsoon.

## >Daaweynta Biyaha Aqalku ma yihiin qaar badbaadsan?

Arrimaha gaarka ah ee ku saabsan ka hortaggu qayb kasta waa ay ku jirtaa. Marka aynu si guud u hadalno, qaababka iyo daawooyinka lagu xusay buugan waa qaar badbaadsan. Si kastaba ha ahaatee waa in caruurta laga ilaaliyo marka la isku darayo kimikada ay daawadani ka samaysan tahay.

## >Biyo intee le'eg ayaa u baahan in la Daaweeyo?

*Hadba intii loo baahan yahay.*

Biyaha nadiifta ahi badiyaaba way ku yar yihiin meelaha ay ka jiraan xaaladaha degdega ahi, qaababka daaweyneed ee buugan lagu xusayna waxay ku kacayaan kharash marka loo eego waqtiga iyo lacagtaba. Xadiga ugu yare ee biyaha u baahan in la daaweeyo waa inta cabista looga baahan yahay iyo kuwa lagu diyaarinayo cuntada aan dabka galayn. Badiyaaba ilaa 5 litir ayaa qofkiiba u baahan karaa maalintii, laakiinse tani way isbedeli kartaa iyadoo ay ku xidhan tahay cimilada iyo dadkaba.

Haddii biyaha aan daaweynayni ay u muuqdaan qaar suurtoagal oo nadiif ah, **caadi ahaan** uma baahnaan doonaan in la daaweeyo ka hor iyadoo looga baahdo mooyee maydhasho jidh iyo dhaqid.

## >Waa Maxay Qaababka Daaweyntu?

Buugani wuxuu diirada saarayaa saddex qaybood oo daaweynta biyaha ah:

- Jeermis ka dilis – waxa la hubinayaa in ay biyuhu nadiif ka yihiin wixii jeermis ah ee xanuun dhalinaya. Tan waxa lagu samaynayaa iyadoo la adeegsanayo kiimiko, karin, ama cadceeda.
- Kala fadhiisin – in la sugo biyaha inta khashinka ahi inta ay hoosta fadhiisanayso taasoo muddo qaadanaysa.
- Safayn – in laga saaro khashinka biyaha iyadoo la adeegsanayo biyo-miire, dhari ama bataax (ciid).

## >Sidee ayaan u Doortaa Qaabka Daaweynta?

Fiiri *geedka go'aanka daaweynta biyaha aqalka iyo kaydintooda* ee ku jirta buugan taasoo tilmaamo tallaabo tallaabo loo qaadayo lagu dooranayo qaabka daaweynta.

Doorashada qaabku waxay ku xidhan tahay goobta iyo nooca xaaladda lagu jiro hadba. Run ahaantii ma jirto jawaab sax ama xal sugan. Mararka qaarkood doorashadu waxay ku xidhan tahay hadba wixii la heli karo. Ta ugu muhiimsani waxa weeye in dadku hadba qaabka ama daawada ay isticmaalayaan ay aqoon u leeyihiin.

# >Qaababka Daaweynta Biyaha

## Aqalka

### >Shaandhayn

Shaandhaynta biyuhu waa tallaabada koowaad ee ugu muhiimsan, haddii si sax ah loo sameeyana waxay horumarin kartaa waxtarnimada dhammaan qaababka lagu xusay buugan.

Marka lagu shubo biyo dhoobo leh oo muuqaalkoodu wasakhaysanyahay weel iyadoo loo dhigayo maro nadiif ah oo ka samaysan cudbi, waxay ka saaraysaa biyaha xaddi ka mid ah qashinka iyo ugxanta cayayaanka ee biyaha ku dhex jirta.

Tijaabo fudud oo aad ku ogaan karto maradu ku haboon ee wax lagu shaandhayn karo. Haddii qashinku uu ka gudbi waayo marada si fiican ayay u shaqaynaysaa, waxaana ugu fiican marada ka samaysan cudbiga taasoo ah mid aanad waxba ka dhex arkayn.

Mar kasta oo aad isticmaasho marada oo aad maydhaa waxay ka dhigaysaa shaandhaynta mid waxtar leh.

Shaandhayntu ma aha ta kaliya ee biyaha wasakhda iyo jeermiska ka saarta, laakiinse daaweynta ayay fududaysaa.






## >Jeermis-ka-dilis

Hadii biyuhu nadiif yihiin laakiinse ay suurtoagal tahay in ay jeermis leeyihiin, waxa waajib ah in jeermiska laga dilo.

Buugani wuxuu ka hadlayaa saddex nooc oo jeermis-ka-dilis ah.

- Karin
- Cadceeda
- Kimiko



Jeermis-ka-dilistu waxay badiyaaba saamaysaa dhadhanka biyaha

- Karintu waxay biyaha ka dhigtaa qaar dhadhankoodu yahay khafiif
- Cadceedu waxay ka dhigtaa biyaha kulayl
- Kimikooyinku waxay biyaha ku reebaan dhadhan xun

Dhibaatooyinkaas oo dhan waxa lagu joojin karaa qaab fudud. Waxaa muhiim ah in aad arrinkan kala sheekaysato dadka isticmaala qaababkan si aad u hubiso in aanay joojin biyaha nadiifta ah ee laga keeno goob aan badbaadsanayn ama joojinta daaweynta biyaha ay soo dhaansadaan.

## >Karinta

Karintu waa hab qadiimi ah oo lagu daaweeyo biyaha. Haddii si sugan loo sameeyo waxay siin kartaa biyo nadiif ah dadka aan lahayn qaabab kale oo kan dhaama.

Karintu waxay leedahay natiijooyin togan iyo kuwo tabanba.

+ Karintu waxay dishaa dhammaan jeermiska xanuunka keena.

+ Karinta biyuhu waa shay ay dadku iskood u samaysan karaan.

- Waxay qaadanaysaa hal kiiloo garaam oo xaabo ah in aad ku kariso hal litir oo biyo ah hal daqiiqo gudeheed. Karinta laguma samayn karo meelaha xaabadu ku yar tahay sidoo kalena aanay jirin waxyaabo kale oo wax lagu kariyo.

- Karintu ma aha mid biyaha ka dhigaysa qaar saafi ah.

- Karintu ma leh saamayn muddo dheer. Sidaas darteed haddii aan si fiican loo kaydin waxa laga yaabaa in ay dib u wasakhoobaan maalmo kadib.

Karintu waxay waxtar leedahay oo kaliya marka heerkulku aad u sarreeyo. Biyuhu marka ay qiiqaan ma karsana.



Si aad u ogaato karinta, ***waa in ay biyuhu is-laba-rogaan.***



## >Muddo intee le'eg ayaan kariyaa?

Heerka hoose *waa hal minit oo ay biyuhu is-laba-rogaan.*

Heerka sarena *waa saddex minit oo ay biyuhu is-laba-rogaan.*



### Talo Bixin

Karintu dhadhanka biyaha waxay ka dhigtaa qaar khafiif ah. Tanna waxaad ku baabi'in kartaa adigoo ku dara litir kasta oo la kariyo xaddi yar oo milix ah.

## >Jeermis-ka-dilista Cadceeda

Biyaha oo loo dhigo cadceeda waxay ka dishaa jeermiska sababa xanuunada. Tanna waa mid waxtar leh maadaama heerkul sare ay tahay (inkastoo heerkulka biyuhu aanay habboonayn in ay ka kor maraan 50° C).

Qaababka ugu fudud ee biyaha cadceeda loogu daaweynayo waa in loo dhigo cadceeda biyaha oo lagu shubay quraarad ama caagad. Gobolada ku yaala kulaalayaasha (tropical regions) mudada qoraxda biyaha lagu daynayaa waa shan saacadood oo waqtiga duhurka ah.

Mudada ay biyuhu cadceeda oolayaan waa in la libinlaabaa marka biyaha midabkoodu bedelan yahay (laba maalmood ku daa halkii ay ka ahayd maalin kali ah). Sidoo kale, waqtiga at buyuhu cadceeda oolayaan waa in la kordhiyaa haddii ay xilli roobaad tahay oo uu cirku daruuro leeyahay.


## >Sidee ayaan u isticmaalaa Jeermis-ka-dilista Cadceeda?

Qaabkan afka qalaad waxa loo yaqaanaa habka SODIS, waxaana la isticmaalaa **quraarad** ama **caagad** si ay u kordhiso heerkulka biyaha adigoo u dhigaya qorax toos ah.

Qaabkani waxa uu waxtar yeelanayaa marka aad dhigto quraada jiiingada aqalka dusheeda.

Iftiinka Cadceeda ee xoogani wuxuu dilaa jeermiska!

Haddii aan quraarad la helayn, waa in biyaha lagu shubaa caagad saafi ah oo ay cadceedu ka dhex tifi karto.



## Talo Bixin

Si aad habkan u dedejiso, buuxi quraarada afar meelood saddex kadibna si xoog ah u rux. Kadibna inta hadhay buuxi oo cadceeda u dhig. Ruxitaan dheeraad ah oo aad ku samayso inta ay cadceeda u taalo waxtar ayuu isna u yeelanayaa habkan.



## Talo Bixin

Dadku ma jecla in ay cabaan biyaha diiran ee la daweyay. Ku dhiirigali in ay sugaan inta ay qaboobayaan.

Jeermis-ka-dilista cadceedu waxay leedahay natiijooyin togan iyo kuwo taban.

- + Jeermis-ka-dilista cadceedu waxay dishaa jeermiska sababa xanuunada haddii muddo badan ay cadceeda yaalaan.
- + Jeermis-ka-dilista cadceedu waa wax ay dadku iskood u samaysan karaan iyadoo waxa lagu samaynayaana ay mar kasta suurtoagal tahay (quraarado saafi ah iyo caagado).
- Jeermis-ka-dilista cadceedu ma laha saamayn hadhaysa, sidaas darteed haddii si aan dhawrsanayn loo kaydiyo biyaha dib ayay u wasakhoobi karaan. Biyaha qaabkan lagu daaweeyo waa in si dhawrsoon loo kaydiyaa, maalmo yar gudohoodna lagu isticmaalaa.
- Jeermis-ka-dilista cadceedu waxay qaadataa waqti dheer waxaanay u baahan tahay in mar kasta cadceed la helo.

## >Jeermis-ka-dilista Kimikada



Waxa jira kimikooyin badan oo biyaha jeermiska ka dila. Kimikooyinkani waxay ku kala duwan yihiin waxtarnimadooda iyo weliba badbaadsanaanta xagga isticmaalkooda.

Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas waxay badiyaaba u isticmaalaan daaweynta biyaha aqalka marka lagu jiro xaaladaha degdega ah kiniinka Koloriin.

## >Sidee ayaan u isticmaalayaa Jeermis-ka-dilista Kimikada?

### Sida aad biyaha ugu daaweynayso kiniinka koloriin



Ku maydh gacmaha biyo iyo saabuun ama dombas.




Biyahaagu ma saafibaa?



x1


Ku rid 1 xabbo oo kiniina. Dabool weelka.



Sug 30 daqiiqo.



Biyuhu hadda waa diyaar.



Biyahaagu ma wasakhbaa?




Ku safee biyaha maro.




x2

Ku dar 2 xabbo oo kinnina kadib dabool. Dabool weelka.



Sug 30 daqiiqo.




Biyuhu hadda waa diyaar.


## Dareeraha Biyo-ilaaliye (WaterGuard)

Dareeraha lagu ilaaliyo biyuhu waa koloriinta oo dareere ah. Waxaanay u shaqaysaa sida kiniinka koloriin oo kale.


## Sidee Biyaha loogu Daaweyaa Dareeraha Biyo-ilaaliye




Ku maydh gacmaha biyo iyo saabuun ama dambas.




Biyahaagu ma saafihaa?




x1  
Ku dar 1 fur 20kii litir.  
Dabool weelka.




30 daqiigo  
Sug 30 daqiigo.




Biyuhu hadda waa diyaar.




Biyahaagu ma wasakhbaa?




Ku safee biyaha maro.



x2  
Ku dar 2 fur 20kii litir oo dabool.  
Dabool weelka.



30 daqiigo  
Sug 30 daqiigo.



Biyuhu hadda waa diyaar.



Waa in laga taxadaraa marka aad biyaha ku daaweynayso kimikaliska. Waa in aanay daawooyinka kimikalisku indhahaaga gaadhin. Waa in daawooyinka kimikaliska la dhigaa meel aanay caruurta gaadhayn, qalalan oo aan cadceed ahayn.

Daawooyinkani waxay wataan tilmaamo aan ahayn luqada ay dadku ku hadlaan ama akhriyaan.

Hubi dadka isticmaalaya kimikalisku in ay u tababaran yihiin. Fiiri qaybta ka hadlaysa kor u qaadista daaweynta biyaha aqalka iyo kaydinta dhawrsoon ee buugan lagaga hadlayo taasoo si qoto dheer uga hadlaysa arrintan. Arrimaha khuseeya ilaalinta tayada iyo arrimaha sida ballaadhan xooga loo saarayo, kimikooyin sida caadiga ah aqalka nadiifintiisa loo isticmaalo sida kuwa wax lagu dhaqo looma isticmaali karo bedelka daawada jeermiska ka disha biyaha.



### Talo Bixin

Kimikooyinka biyaha jeermiska lagaga dilaa waxtar ma yeelanayaan marka lagu isticmaalo biyo wasakhaysan oo dhoobo leh. Hadday biyuhu u muuqdaan qaar wasakhaysan oo dhoobo leh, waa in aad daawada u libinlaabto.

### Talo Bixin

Marka la libinlaabo kimikooyinka loo isticmaalo jeermis-ka-dilista biyaha, waxay ka dhigaan dhadhanka biyaha qaar aanay dadku jeclaysan. Tanna waxay ku kaliftaa in ay joojiyaan daaweynta biyaha. Dhibaatan la xidhiidha dhadhanka biyaha waxa lagu joojin karaa iyadoo biyaha lagu daro xaddiga saxda ah iyo iyadoo biyaha lagu ruxo quraarad si ay hawada biyaha ku jirto u kordhiso.

### Talo Bixin

Kala hadal dadka daawada ay isticmaalayaan. Isticmaalkeedu ma fudud yahay? Waa sidee dhadhankeedu? Waxa loo baahan karaa daawo kale (fiiri qaybta kale).

### Talo Bixin

Weelka oo daboolka laga qaado oo ay qoraxdu toos ugu dhacdo waxay wax u dhimaysaa waxtarka daawada. Ku dhiirigali dadka in ay daboolaan weelka cadceedana ka fogeeyaan mar kasta oo ay suurtoagal tahay.


Kimikooyinka jeermiska dilaa waxay leeyihiin natiijo togan iyo mid tabanba.

- + Daawooyinkan isticmaalkoodu waa fudud yahay waana mid badbaadsan.
- + Saamayntoodu waa mid muddo sii joogaysa, taasoo daawadeedu ay muddo sii shaqaynayso.
- Daawooyinkani waa qaar dibadda laga keeno ee ma aha wax gudaha laga heli karo mar kasta.
- Kimikooyinka jeermiska dilaa kama takhalusaan jeermiska oo dhan. Waa in ka hor biyaha la sii miiraa si loogu isticmaalo daawada loona hubiyo in khashinkii oo dhan laga takhalusay.



## >Kala-fadhiisinta

Haddii biyuhu yihiin qaar dhoobo leh, in la sugo inta ay kala fadhiisanayaan ama lagu daro kimikooyin waxay ka dhigaysaa wasakhdu in ay hoos u degto oo ay fadhiisato weelka guntiisa taasoo biyaha ka dhigaysa kuwo saafi ah. Kala-shaandhaynta biyaha lagu kala shaandheeyo maro waxay ka dhigaysaa qaabkan mid waxtar leh.




**Ogow:** Biyaha lagu saafi gareeyay *qaabkan* kala-fadhiisintu ma aha qaar *nadiif* ah. Weli biyuhu waxay u baahan yihiin jeermis-ka-dilis si looga saaro jeermiska xanuunka keenaya. Laakiinse marka biyaha laga saafi gareeyo wasakhda iyo dhoobada, tani waxay sahlayaa waxtarweyna u leedahay jeermis-ka-dilista.

## >Qaabka Saddexda Dhari

Qaabka saddexda dhari waxay yareeyaan wasakhda iyo jeermiska sababa xanuunada, iyadoo lagu kaydinaayo biyaha weelal u ogolaanaya wasakhdu in ay gunta fadhiisato isla markaasna lagaga wareejiyo biyaha inta saafiga ah weel kale.

## >Sidee ayaan u isticmaalayaa qaabka saddexda Dhari?

### Qaabka Saddexda Dhari



Maalin kasta oo biyo cusub la keeno aqalka:

- Ka cab biyaha dhariga 3.
- Si degen biyaha ku jira dhariga 2 ugu shub dhariga 3.
- Maydh dhariga 2.
- Si degen biyaha ku jira dhariga 1 ugu shub dhariga 2.
- Maydh dhariga 1.
- Biyaha goobta laga soo dhaamiyay eek u jira (baaldiga 4) ku shub dhariga 1.

Sug hal maalin inta ay biyuhu kala fadhiisanayaan kuna celi habkan.

Waxa kaliya ee aad cabbaysaa biyaha ku jira dhariga 3. Biyahani waxa ay yaalaan laba casho ugu yaraan, tayadooduna waa ay fiican tahay. Dhawrkii jeerba mar ayaad maydhaysaa dhariga waxaanad ku nadiifinaysaa biyo kulul.

Haddii aad isticmaasho tuumbo si aad ugu kala wareejiyo biyaha labada dhari, way ka dhib badan tahay ku shubista.

**Talo  
Bixin**

Qaabkani wuxuu fiican yahay marka la isticmaalayo marada wax lagu shaandheeyo marka aad biyaha dhariga ku shubayso.

### Talo Bixin

Qaabka saddexda dhari waa ku-meel gaadh wanaagsan kaasoo la sameeyo karo marka lagu jiro xaaladaha degdega ah inta laga gaadhayo qaabab kale oo lagu bedeli karo hadday suurto gal tahay ama iyadoo la horumariyo goobta biyaha laga helo.

### Talo Bixin

Mar lagu jiro xaaladaha degdega ah dadku ma heli karaan saddex weel. Sidaas darteed waxay u muuqataa in waxtarkeedu ka yaraanayo qaabkan kor lagu soo sheegay. Laba weel waa la isticmaali karaa halkii laga isticmaali lahaa saddex. Waa in waqti fiican la siiyaa inta ay biyuhu kala fadhiisanayaan jeermiskuna ka dhimanayo.

Qaabka saddexda dhari wuxuu leeyahay natiijooyin togan iyo kuwo tabanba.

- + Qaabka saddexda dhari wuxuu yareeyaa wasakhda iyo jeermiska keena xanuunada.
- + Qaabkani waa mid kharash yar, isticmaalkiisu fudud yahay, isla markaasna ay dadku iskood u samaysan karaan.
- Qaabkani wuxuu yaraynayaa jeermiska laakiinse kama wada takhalusayo. Waxa loo baahanayaa karin, kimiko ama cadceeda in lagaga dilo inta hadhay jeermiska.

## > Kimikada Kala-Fadhiisinta

Kala-fadhiisinta kimikadu waa isticmaalka loo isticmaalo kimikada si ay u dedejiso ka saarista wasakhda ee biyaha.

Labada haba ee qaabakan kala-fadhiisinta kimikada ee ay badiyaaba isticmaalaan xidhiidhka caalamiga ee bilaha iyo laanqayraha cas marka lagu jiro xaaladaha degdega ah waxa lagu yidhaahdaa af qalaad PUR iyo Watermaker.



5g waa 20 litir



2.5g waa 10 litir




4g waa 10 litir

Kimikooyinkani waa qaar faa'iido leh gaar ahaan marka ay jiraan daadadku, maxaa yeelay waxay wasakhda ka saaraan biyaha sidoo kalena jeermiska ayay ka dilaan. Labadan qaab waa kuwo ku haboon daaweynta biyaha aqalka marka lagu jiro xaaladaha degdega ah, si isku mid ah ayaanu u isticmaalaa xidhiidhka caalamiga ah ee bilaha iyo laanqayraha casi.

## > Siday u shaqaysaa?

Daawooyinkani waxay ka kooban yihiin laba kimiko. Midi waxay u eg tahay xabagta, waxaanay ka samaysan tahay walxo yaryar oo is-jiidanaya, kuwaasoo marka dambe waynaada si degdegana gunta weelka u fadhiista.



Nooca kale ee kimikadan biyaha nadiifisaa waa mid la mid ah tii aynu qaybaha hore kaga soo hadlnay ee daawada ahayd.

## >Haddii ay kimikadani laba jeer waxtar leedahay, maxaynu mar kasta u isticmaali weynay?

Alaabtan ama kimikooyinkani aad ayay qaali u yihiin, waanay adag tahay in mar kasta loo isticmaalo sida qaababka kale. Haddii biyuhu 1) saafi yihiin ama inyar uun uu midabkoodu bedelan yahay iyo 2) la heli karo kimikada jeermiska disha, ma isticmaalaysid qaabkan kimikada ee biyaha kala-fadhiisida.


## >Sidee ayaan u isticmaalaa kimikada kala-fadhiisinta?




Isha biyaha markii hore laga helay



Sida ay walxuhu isugu dhageen



Sida ay walxuhu isugu dhageen kadib markii la walaaqay



Biyaha oo lagu shaandhaynayo maro cudbi ah laguna wareejiyay weel kale



Biyihii oo isticmaal u diyaar ah

### Talo Bixin

Waxa fiican in baaldi saafi ah aad ugu soo bandhigto dadka si ay u ogaadaan habka uu qaabkani u shaqaynayo. Tirada dadkana yaree si qof kastaaba waxan u fahmo una barto!

### Talo Bixin

Waxa fiican in aad maro ku shaandhayso marka aad weelka biyaha ku shubaysid ee aad isticmaalaysid qaabkan.

Hal baakidh oo PUR ah waxay daweynsaa 10 litir oo biyo ah. Watermakerka isaga waxa laga heli cabir kasta iyo xaddi kasta, taasoo isticmaalkeedu ku xidhan yahay hadba xadiga ay le'eg yihiin biyaha aad daaweynaysa. Hubi tilmaamaha baakidhka ku dul qoran in aanad dadka u sheegin ka hor.


Kimikada kala-fadhiisintu waxay leedahay natiijooyin togan iyo kuwo taban.

- + Daawooyinkani biyo dhoobo leh ayay ka dhigaan kuwo nadiif ah.
- + Saamayn muddo dheer hadhaysa ayay leeyihiin taasoo jeermiska dilaysa, isla markaasna daawada kadib ka ilaalinaysa biyaha in ay dib u wasakhoobaan.
- Daawooyinkan isticmaalkoodu aad ayuu u adag yahay waxaanay u baahan yihiin tababar la socod joogto ah.
- Daaweynta qaabkan la isticmaalayaa waa mid aad uga qaalisan qaababka kale ee daaweynta biyaha, waxaana la isticmaalayaa oo kaliya marka ay biyuhu dhoobo leeyihiin isla markaasna aanu jirin qaab kale oo looga wareegi karo.
- Qaabkan waxa loo isticmaalayaa in ka badan hal weel.

# > Biyo-Safaynta

Biyo-safeeyuhu wuxuu biyaha ka saaraa khashinka, isagoo biyaha u ogolaanaya in ay socdaan khashinkana la hadhaya. Biyuhu waxay dhex maraan qalab loogu talagalay sida ciid-bataax ama wax dhoobo ka samaysan; waxyaabaha dhibta keensanayana waxa lagu reebaa safeeyaha. Biyo-safeeyaha badiyaaba looma isticmaalo xaaladaha degdega ah oo kaliya. Si kooban ayaa halkan loogaga hadli doonaa. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan biyo-safeeyaha waxa laga heli karaa ilo kale (fiiri buugaagta kale ee mawduucan ka hadla).

## > Biyo-Miire/Safeeye



Biyo-safeeyaashu ka samaysan yihiin dhoobo waxayna ka kooban yihiin laba nooc oo kala ah nooc sida baaldiga u eg iyo nooc Shamaca u eg.

Biyaha waxa lagu shubayaa hal weel kuwaasoo si qunyar ah ugu gudbinaya weel kale. Biyo-sifeeyuhu wuxuu leeyahay gudad yar yar kuwaas oo qabta jeermiska keena xannuunada isla markaana biyaha siidaynaya. Biyaha sifaysani waxay u gudbayaan weelka hoose ee biyo sifeeyaha/biyo miiraha kaasoo biyaha nadiifta ah laga cabi karo.

Sifeeyaha (Filter) waxa lagu xoqayaa burush marka kasta oo uu awdmo ama socodka biyuhu yaraado si biyuhu dhaafaan.

Saabuun waxaa loo isticmaali karaa biyo-miiraha shamaca ah laakiin biyo-miiraha nooca baaldiga u samaysan looma isticmaali karo. Hadday suurtoagal tahay, waa in la kariyaa Safeeyaha (Filter) si looga dilo jeermiska uu qabtay. Waxyaabaha kale ee uu ka kooban yahay biyo-miiruhu/sifeeyuhu caaga, qasabada/rubineetada waa in lagu dhaqaa saabuun iyo biyo kulul markasta.



Marka wasakhda biyuhu ayaa aad u sii badataba, safeeyuhu wuxuu u baahanayaa nadiifin. Nadiifinta iyo xoqidda bandanna waa ay madhisaa safeeyaha sidaas darteed waxa muhiim in la bedelo. Biyo-safeeyaha shamaca ahi waxa uu leeyahay nadiifinta togan iyo kuwo taban.

### *Faa'iidooyinka/nadiifinta togan:*

- + Qalabkani waa fudud yahay, isticmaalkiisuna waa mid badbaadsan.
- + Haddii si fiican loo dayactiro, waxa qalabkan la adeegsan karaa muddo dheer.
- + Biyaha nadiifta ahi malaha dhadhan biyo daaweysan mid xun midna

### *Faa'iidooyinka/nadiifinta taban:*

- Qalabkani waa qaali, waana wax si fudud u jabi kara.
- Waxa uu qaataa waqti dheer in uu biyaha ku nadiifiyo gaar ahaan marka ay biyuhu wasakh badan leeyihiin.
- Ma laha saamayn hadhaysa oo jeermiska sii disha. Sidaas darteed mar kasta oo biyaha lagu nadiifiyo waa in weelka biyaha la daboolo si aanay dib ugu wasakhoobin.
- Qalabkani waxa uu u baahan yahay dayactir joogto, tababar iyo la socod.



## > Safaynta Biyaha ee Ciid-Bataaxda

### > Daaweynta horteed

Safaynta ciidu waa ta ugu fudud uguna dhakhsaha badan ee hordhac ahaanta loogu isticmaalo daaweynta, taasoo yaraysa wasakhda biyaha isla markaasna dardargalisa habka jeermis-ka-dilista biyaha.

Waxa aad biyaha wasakhaysan ku shubaysaa weel lagu guray bataax iyo jay. Waa in weelka aad wax ku shubaysaa uu gunta hoose ku lahaadaa qasabad yar oo ay biyuhu ka baxaan. Kadibna sidaas ayaad biyaha qasabadaas soo dhaafa aad ugu dhaaminaysaa weelkaaga kaydka.

Ciida daawada ka horaysaa ee wax lagu safeeyaa waxay leedahay natiijooyin iyo togan iyo duwo tabanba.

- + Qaabkani waa mid fudud isticmaalkiisuna yahay mid degdeg ah.
- + Waa hab waxtar leh oo biyaha qashinka loogaga saari karo iyo weliba qaar ka mid ah jeermiska.
- + Waa mid aan qaali ahayn haddii degaankaaga aad ka heli karto ciid-bataax iyo weelkaba.
- Waxay u baahan tahay saddex weel iyo qasabad yar.



### > Safeeyaha Ciida iyo Bayolajiga ah

Inkastoo aan badiyaa la isticmaalin qalabkan marka lagu jiro xaaladaha degdega ah, hadana safeeyaha ciida iyo bayolajiga ahi waa mid waxtar weyn leh isla markaasna waxqabadkiisu uu muddo dheer sii jiri karo. Safeeyayaasha Ciida iyo Bayolajiga ka samaysan waxay ku sameeyaan biyaha ciid IYO walxo baayoolaji ah oo ka dul baxa safeeyaha dushiisa. Safeeyahan waa la nadiifin karaa marka uu awdmo.

Maxaa yeelay walxahan baayoolajiga ee safeeyuhu waa qaar koraya sidaas darteed waxba ma dawaynayaan marka ay cusub yihiin iyo marka la nadiifiyaba.

Inkastoo safeeyahan isticmaalkiisu fudud yahay, hadana wuxuu u baahan gacmo u tababaran marka la qaybinayo. Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan sida loo samaysanayo safeeyahan iyo weliba sida loo dayactirayo waxaad ka heli kartaa agabyada dheeraadka ee ku saabsan mawduucan.

- + Haddii si fiican loo dayactiro, safeeyahan waxa uu biyaha daaweyn karaa muddo dheer.
- Waqti ayay ku qaadataa in uu safeeyahani in uu biyaha daaweeyo, gaar ahaan marka ay biyuhu aad u wasakhaysan yihiin.
- Ma laha saamayn muddo dheer sii jiraysa. Sidaas darteed, biyaha aad ku safayso waa in aad markiiba weel kale kaga wareejisaa isla markaasna aad daboosho si aad uga ilaaliso jeermiska.
- Safeeyayaashani waxay u baahan yihiin ka shaqayn joogto ah, sidoo kale waxay u baahan tababar badan iyo la socod.



# > Kaydinta Dhawrsoon iyo Ilaalinta



Weelka qoorta dhuuban wuxuu ilaaliyaa ama ka hortagaa wasakhawga, laakiinse waxa adag nadiifintiisa.

**Laakiinse dhibaato ayaa jirta**

Weelka qoorta ama afka ballaadhan way fududahay sida uu ku wasakhoobaa, laakiinse nadiifintiisaa fudud.

Dedaalada biyaha lagu nadiifinayaa waxay noqonayaan qaar bilaa macno ah haddii aan si sugan biyaha loo kaydin loona ilaalin.

Xaaladaha degdega ah, dadku waxay isticmaalaan hadba wixii weel u yaala ee ay haystaan amaba kuwa waqtigaas la siiyo. Labaduba si fiican ayay kuugu shaqaynayaan.

Marka kasta ku dhiirigali dadka in ay nadiifiyaan weelkooda biyaha isla markaasna ay daboolaan, meel caruurta ka dheerna ay dhigaan. Waxa fiican in gooni lagaga kala dhigo weelka biyaha lagu soo dhaamiyo iyo kuwa lagu kaydiyo.



Weelka qoorta dhuuban, ku dhiirigali dadku in ay si joogta ah ugu nadiifiyaan saabuun ama kimikooyinka jeermiska dila (hadday suurtoagal tahay), ama quruurux.



Weelka afka ballaadhan, ku dhiirigali dadka in ay mar kasta daboolaan una samee qaab mar kasta ay biyaha uga shubtaan si aad uga ilaaliso biyaha in ay gacmuhu gaadhaan. Kani wuxuu noqon karaa dawlis dheer ama wax laalaada oo aad kaga dhuran karto biyaha ku jira weelka. Sidoo kale waxaad weelka guntiisa ku samaysan kartaa qasabad yar oo aad ka shubatid biyaha. Sidoo kale waxaad ku dhiirigalisaa in ay mar kasta nadiifiyaan weelkooda.



Xataa marka la horumariyo tayada ilaha biyaha, waa in la sameeyaa olole lagu horumariyo kaydinta iyo ilaalinta biyaha, kaasoo faa'iido u ah caafimaadka dadka.

**MAR KASTA** ku dhiirigali dadku in ay maydhaan gacmahooda ka hor dhaaminta biyaha cabista. Marka la samaynayo qaybinta agabyada daaweynta biyaha aqalka waxa iyana fursad muhiima ah in la dhinac wado qaybinta agabyada fayadhawrka sida saabuunta, isla markaasna aad bixiso fariinta la xidhiidha nadaafada iyo fayadhawrka.



# > Kor u Qaadista Daaweynta Biyaha

## Aqalka iyo Kaydintooda



Sawirada waxaa iska leh IFRC

### > Tababar

Kimikaliska waa INAAN dadka loo qaybinta ka hor inta aan isticmaalkooda la barin. Ka hor qaybin samee qorshihii tababarka lagu qaban lahaa. Waxa lagugula talinayaa in aad tababarkaaga isticmaalka kimikada aad dhexgaliso waxooga ku saabsan kor u qaadista waxyaabaha ku saabsan fayadhawrka ee hoos lagu xusay

Tilmaamaha ku saabsan daaweynta kiimikada waa in ay ahaataa mid istandar ah oo qiyaas leh, sida jerikaanka ama caagada 20ka litir ah inta lagu daaweynayo ama baaldiyada 10ka litir ah (fiiri xaashida xogtan lagu xusay). Dadku waxa laga yaabaa in ay isticmaalayaan weelal ay iyagu iskood u samaysteen oo kala duwan kuwaasoo aan cabir

ku salaysnayn. Tusaale ahaan dhoobo-dhari muggeedu yahay 14 litir. U samee oo kala shaqee sidii ay heli lahaayeen cabir sugan oo ay fahmayaan kuna saleeyaan weelashooda isla markaasna ay iyagu daaweystaan biyahooda.

**Haddii aanay dadku aqoon u lahayn daawada, gaar ahaan kuwa kimikada ah, arrimo la xidhiidha aaminaad ayaa soo if-bixi kara. Dariiqada kaliya ee ugu fudud ee dhibaataadaas aad kaga gudbi karto waa in aad adigu shakhsi ahaan u sameeyso sida loo daaweynayo biyaha si ay dadku fikir buuxa uga qaataan.**

Marka aad bixinayso tababarka, isku day in aad marka hore adigu soo bandhigto isticmaalkooda. Koloriinta waqti ku filan oo ay dadka kaga dhaadhicin kartaa, laakiinse filterka ama safeeyuhu wuxuu u baahan yahay in aad sugto inta uu biyo la cabi karo samaynayo iyadoo dhagaystayaaashaduna ku hor joogaan.

### > Shaqada kor u qaadista fayadhawrka

Kimikaliska oo dadka loo qaybiyaa kali ahaan kuma fila guud ahaan horumarinta caafimaadka. Dadku in ay sameeyaan daaweynta biyaha aqalka iyo kaydinta dhawrsoon waxay ka dhigan tahay qaab lagu bedelayo hab-dhaqanka dadka.

Wixii ku lidi ah aaminaada, isbedelka caadooyinka iyo dhaqamada badiyaaba waqti dheer ma qaataan in ay ku qabsoomaal, xataa isbedelka waqtiga gaabani faa'iido ayay u noqon karaan meelaha ay ka jiraan khataraha caafimaad. Haddii ay dadku dareemaan in ay nafahoodu khatar ku sugan yihiin, waxay u eg yihiin in ay si degdeg ah u bedelaan hab-dhaqankooda.

Sidaas awgeed, haddii rabitaankaas isbedel la suurto galiyo, si dhakhso ah ayuu u dhici karaa. Tusaale ahaan, weel biyood oo la siiyo dadka si ay ugu fududayso qoysaska in ay si dhawrsoon ugu kaydadaan biyahooda aqalka. Waana in loogu adkeeyaa hadba siday suurto galka ku tahay lana wacyigaliyaa dumarka, ragga iyo caruurta si loo qaado **tallaaboyinka** ku haboon ee lagu yaraynayo khataraha caafimaad. Tan macnaheedu waa dadka oo la baro sida ay u samaynayaan fayadhawrka saxda ah xaggay ka samayn lahaayeen wacyigalinta caafimaad darrada.

Marka lagu jiro xaaladaha degdega ah waxa kaliya ee keeni kara isbedelku waa iyada loo la fahmo ahmiyadda caafimaad. Laakiinse tani ma aha arrin mar kasta muhiim. Waxa muhiim in aad aqoonsato dhaqamada iyo xeerarka bulshada dhexdeeda ee dhiirigalin kara isbedelka hab-dhaqanka bulshada. Tusaale ahaan, hooyadu way samayn kartaa qaab ka mid qaababka daaweynta biyaha aqalka kadib markay ka aragto jaarkeedii oo isticmaalaya.

Helitaanka noocan ah ee fayadhawrku wuxuu dhiirigalin u noqonayaa in ay dadku mar kasta ka shaqeeyaan hawlaha kor loogu qaadayo fayadhawrka. Dhawr agab ayaa la heli karaa kuwaasoo lagu isticmaali karo kor u qaadista la qabsiga hab-dhaqanka fayadhawr sugan marka lagu jiro xaaladaha degdega ah. Fadlan fiiri agabyada dheeraadka ee mawduucan khuseeya.

Qaybinta kimikooyinka daaweynta biyaha aqalku waxay fursad fiican inoo siinayaan in aynu iyana qaybino saabuunta iyo agabyada kale ee aan cuntada ahayn (NFI) ee la xidhiidha biyaha iyo fayadhawrka iyo weliba in la baahiyo fariimaha muhiimka ah ee la xidhiidha fayadhawrka, ilaalinta biyaha iyo kaydintoodaba. Fursadda ugu muhiimsan ee lagu suurtoogalin karo caafimaad iyo fayadhawr sugan waa iyadoo dadka la siiyo xog ku filan oo ku saabsan faa'iidooyinka caafimaad ee ay leeyihiin agabyadan loo qaybiyay.

**Afar tallaabo oo aasaasi ah oo loogu talagalay ololayaasha kor u qaadista fayadhawrka marka lagu jiro xaaladaha degdega ah:**

## 1 Samee qiimayn aad diirada ku saarayso biyaha, nadaafadda iyo fayadhawrka

Biyaha					Nadaafadda	Fayadhawrka
Isha Biyaha	Dhaaminta iyo qaadista	Kaydinta Biyaha	Daaweynta Biyaha	Isticmaalka Biyaha	Isticmaalka Musqusha	Gacmo-maydhista
<p><b>1</b> Ilaha biyaha waa in si taxadir leh loo isticmaalaa, si fiicana loo dayactiraa.</p> <p><b>2</b> Waa in aanay jirin khatar washaw oo ka iman karta musqulaha, bullaacadaha, xayawaanka ama waxyaalo dusha kaga dhaca ceelka.</p>	<p><b>3</b> Biyaha la cabayo waa in lagu shubaa weel nadiifa, iyadoo aan gacmaha la galin.</p> <p><b>4</b> Biyaha waa in lagu qaadaa weel daboolan.</p>	<p><b>5</b> Biyaha waa in lagu kaydiyaa weel nadiifa oo daboolan si joogta ahna loo nadiifiyo.</p> <p><b>6</b> Biyaha la cabayo waa in weel gooni ah lagu kaydiyaa.</p>	<p><b>7</b> Qaabka daaweynta biyaha waa in loo fuliyo heer aqal haddii goobta biyuhu aanay nadiif ahayn isla markaana aan si sugan loo kaydin.</p>	<p><b>8</b> Weelka biyaha cabista waa in lagaga haansadaa weel dawlis leh sidaas darteed gacmaha, koobabka and shayda kale ma wasakhayn karaan biyaha</p>	<p><b>9</b> Waa in musqulo la isticmaalaa halkii lagaga saxaroon lahaa dhulka furan.</p> <p><b>10</b> Musqulaha waa in laga sameeyaa meelo ka fog goobaha biyaha lana nadiifiyaa.</p> <p><b>11</b> Godadka qashinka waa in la madhiyo si joogta ahna loo bedelo.</p>	<p><b>12</b> Waa in aqalka laga helaa saabuun ama dambas gacmaha lagu dhaqo.</p> <p><b>13</b> Waqtiyada adag mar kasta waa in dadku gacmaha dhaqdan.</p>

## 2 Dooro kooxo bartilmaameed

Marxaladaha hore ee xaaladda degdega ah, badiyaaba waxaynu qabanaa ololayaal ballaadhan oo aan la bartilmaameedsanayn wax kooxo ah. Taas bedelkeeda waxa lagula talinayaa in aan taqaano cidda aad la hadlayso si fariimaha aad gudbinaysaa ay toos u waajahaan cidda laga rabo in ay fuliso hawshan ee loogu talagalay.

Tusaale ahaan, marka ay caruurto yihiin kuwa ka masuulka ah dhaaminta biyaha aqalka, waxay loo baahan yahay in ay iyagu noqdaan cidda bartilmaameedka laga dhiganayo loona fidinayo fariimaha la xidhiidha hab-dhaqanka biyo-dhaaminta iyo qaadistoodaba.

### 3 Samee farriimaha la Xiriira fayadhawrka

- A Fariinta aad gudbinaysaa waa in ay ahaadaan kuwo kooban oo ficil ah: markay kooban yihiin ayay wanaagsan yihiin! Fariimaha oo aad badisaa culays ayay la imanaysaa.
- B Marka aad fariimaha u jeedinayso dhinaca fiican wax ka tus isla markaasna adeegso dareen wanaagsan oo aad dadka wax kaga dhaadhicin kartana aad adeegsato mar kasta oo ay suurtoagal tahay
- C Fariimaha fayadhawrku waa in ay ahaadaan weedho fudud oo ah luqada ay dadku rayidka u leeyihiin.

Hadday suurtoagal tahay ku sii tijaabi fariimahaaga koox isku da' ah, heerkooda aqooneed isku mid yahay isla markaasna isku dhaqan oo ka mid ah dadka fariintan loogu talagalay.



Sawirada waxaa iska leh IFRC

### 4 Dooro qaababkaaga gudbineed

Doorashada qaabka gudbintu wuxuu ku xidhan yahay dabecada dhagaystayaasha iyo hadba agabyada la heli karo. Xaaladaha degdega ah, warbaahintu waa qaabka gudbineed ee loogu isticmaalka badan yahay si dhakhso loogu gaadhsiyo fariimaha dhagaystayaal ballaadhan iyadoo kharash badan aan la isticmaalin.

Dadku waqti iyo ahmiyad ayay siiyaan fariimaha qoran ee la qaybiyo. Tana waa fursad wanaagsan oo fariinta si degdega loogu gudbin karo dad aad u tiro badan.

Goobaha aad fariimahan ku qaybisid waa in aad ku qabataa waxqabadyo kala duwan adigoo isticmaalaya **baahinta caanka ah** sida riwaayado, heeso, puppets (kartooniska sida xayawaanka u samaysan ee dadka lagaga qosliyo), sheeko, iwm (dhammaantood madadaalo ayay dadka u noqonaysaa iyo iyadoo ficil ahaan lagu gudbiyay fariintii) ama **warbaahinta** iyadoo fariinta lagu gudbiyo sameecado, boodhadhka yaryar, waraaqo, boodhadhka waaweyn ee wadooyinka lagu xidho, waraaqaha gidaarada lagu dhejiyo, garamo, iwm...

Fariimaha lagu gudbiyo warbaahinta waxa lagu xoojin karaa shaqooyin aad toos u waajahayso oo **weji-ka-weji ah**. Shaqooyinkaas waxa ka mid ah sida iyadoo la fuliyo booqashooyin aqal-ka-aqal ah iyadoo weliba ay dhinac socoto qaybinta agabyada aan cuntooyinka ahayn. Booqashada aqal-ka-aqalka ahi waxay fursad u siisaa kuwa ka shaqaynaya kor u qaadista fayadhawrka in ay qiimeeyaan degaanka hoose si ay fariimaha fayadhawrka u waafajiyaan baahiyaha qoyska.

Waxyaabaha tixgalinta mudan marka la samaynayo booqashooyinka aqalka:

- Booqashooyinka waxay u baahan yihiin in loo fuliyo si dareen ku dheehan yahay. Xataa marka lagu jiro xaaladaha degdega ah waxyaabaha qaarkood ayaa u baahan in la ixtiraamo.
- Celcelis ahaan 1 mutadawac ayaa booqan kara 5-6 aqal maalin kaliya oo shaqo (4 saac).
- Waxyaabaha muuqaalka caawiya sida flip chartka, boodhadhka, ama sawiradu waxay muhiim u yihiin kor u qaadista mawduucan marka laga hadlayo.
- Waxa muhiim ah in la muddeeyo booqashada qorshana loo dejiyo, xaafaduhuna waxay u baahan yihiin in lagu sii wargaliyo ka hor waqtiga booqashada hadday suurtoagal tahay. Marka lagu jiro xaaladaha degdega ah, waxa ay ku mashquulsan yihiin dadku sidii ay u xasilin lahaayeen nolol-maalmeedkooda.


## > Ka Warhayn

**Hal cashar** oo ku saabsan isticmaalka qaababkani **kuma filla**. Tababaro joogto ah oo lagaga warhaynayo waa in la sameeyaa mar kasta oo uu u dhammaado tababarka hore.

Fayadhawruhu waa in uu awoodaa in uu mar kasta gadaal kala socdo isbedellada bulshada dhexdeeda ee la xidhiidha:

- Sida ay dadku ugu qanacsan yihiin daawada ay doorteen.
- Icticmaalka saxda ah ee daawooyinka.
- Samaynta fayadhawrka ee dadka ee la xidhiidha ilaalinta biyaha iyo kaydintooda.

> Geedka go'aanka daaweynta biyaha aqalka iyo kaydinta dhawrsoon



Horumari kala-miirista, qaabka saddexda dheri jeermis-ka-dilista cadceeda iyo kaydinta dhawrsoon iyo ilaalintooda ilaa inta laga horamarinayo goobta biyaha ama la helayo habab kale.

Horumari kala-miirista, qaabka saddexda dhari, fadhiisinta kimikada la isticmaalo ama safaynta sida degdega ah wax nadiifisa

Horumari kala-miirista jeermis-ka-dilista cadceeda, qaabka saddexda dhari, safaynta aasaasiga ah ee wax lagu nadiifiyo.

Horumari miirista karinta iyo iyo kaydinta dhawrsoon ee biyaha iyo ilaalintoodaba. Waa inaad masuul ka noqoto habka aad u xaabaysan aysid adigoo degaanka llaalinaya.

Isticmaal qiyaas caadi ah oo Kimiko ah. Sidoo kale hour-mari kaydinta dhawrsoon ee biyaha.

Kala-miir biyaha isla markaasna libinlaab isticmaalka daawada.



Ugu yaraan hal bilyan oo dad ahi guud ahaan dunida ma helaan biyo cabitaan oo nadiifa. 4 milyan oo dadkaas ka mid ahi waxay u badan yihiin caruur kuwaasoo sanad kasta u dhinta sababtaas.





15kii sanno ee ugu dambeeyay, IFRC waxay u adeegeen dad gaadhaya 9 milyan kuwaasoo ay ka caawiyeen barnaamijyada Biyaha iyo Nadaafadda. 14 milyan oo dheeraad ahna waxa la qorsheeyay in ay ka faa'iidaystaan 2015.

## > Warqaddaha Xogta

Warqadahan xogta waxa loo qaabeeyay in si aad ah loogu badiyo looguna qaybiyo dhammaan cidda ay khusayso barashada iyo qaybinta qaababka kale duwan ee buugan ku xusan.

### Qaabka saddexda dheri

**Biyaha cabista:** mar kasta ka qaado dhariga 3. Biyahani waxa la kaydiyay ugu yaraan laba casho, tayadoodana kor ayaa loo qaaday. Mudadiiba dharigan mar ayaa la maydhi doonaa laguna nadiifin doonaa biyo kulul.



Isticmaalka tuumbada ama qasabada oo aad u adeegsato u kala gudbinta biyaha ee dhariyadu waxay khalkhal galinaysaa kala-fadhiisashada biyaha.




Maalin kasta marka biyo cusub la keeno aqalka

Si qunyar ah uga shub dhariga 2 biyaha ku kaydsan dhariga 3, maydh dhariga 2.

Si qunyar ah uga shub dhariga 1 biyaha ku kaydsan dhariga 2, maydh dhariga 1.

Biyaha laga soo dhaamiyay goobta eek u jira (baaldiga 4) ku shub dhariga 1. Waxa fiican in aad ku shaandhayso maro nadiifa




**Talobixin:** Qaabkan waxa lagu horumarin karaa idigoo adeegsada marada wax lagu kala shaandheeyo marka aad dharyaha biyaha ku shubaysid.


## Sida Biyaha loogu Daaweeyo Biyo-Ilaaliye




Ku maydh gacmaha biyo iyo saabuun ama dambas.



Biyahaagu ma saafibaa?



Ku dar 1 fur 20kii litir.  
Dabool weelka.





Biyahaagu ma wasakhbaa?




Ku safee biyaha maro.


30 daqiiqo




Sug 30 daqiiqo.



Biyuhu hadda waa diyaar.




x2



Ku dar 2 fur 20kii litir oo dabool. Dabool weelka.

30 daqiiqo



Sug 30 daqiiqo.



Biyuhu hadda waa diyaar.

## Sida Biyaha loogu Daaweeyo Kiniinka Koloriin




Ku maydh gacmaha biyo iyo  
saabuun ama dambas.



Biyahaagu ma saafibaa?




Ku rid 1 xabbo oo kiniina.  
Dabool weelka.




Biyahaagu ma wasakhbaa?



Ku safee biyaha maro.




Sug 30 daqiiqo.




Biyuhu hadda waa diyaar.



Ku dar 2 xabbo oo kinnina kadib dabool. Dabool weelka.



Sug 30 daqiiqo.



Biyuhu hadda waa diyaar.

## Sida Biyaha loogu Daaweeyo Watermaker

1



Gacmahaaga ku maydh biyo iyo  
saabuun ama dambas.

2



Ku shub baakidh water-maker  
ah baaldiga.

5



Ku shub biyaha daweysan weel  
adigoo ku shaandhaynaya maro nadiifa.

6




Biyuhu hadda waa diyaar.

3



Ku walaaq 5 daqiiqo.

4



Sug 15 daqiiqo.

7



Ku kaydi biyaha weel daboolan.

8



Ha cabin hadii biyaha midabkoodu hurdi noqdaan.


## Sida Biyaha loogu daaweeyo PUR



Qashinka ka soo hadha nadiifinta ku daadi meel caruurta ka fog.



Ku shub baakidh PUR baaldi 10 litira Gacmahaaga ku maydh biyo iyo saabuun ama dambas.



Isticmaal maro 100% cudbi ah oo aan wax daloola lahayn


Ku shub biyaha daaweysan weel adigoo shaandhaynaya.

Haddi ay nadiif noqon waayaan, mar kale walaag ilaa ay ka nadiif noqonayaan.



## 2. Walaaq


5 daqiiqo



si fiican u walaaq




5 daqiiqo sug



Haddi ay nadiif noqon waayaan,  
mar kale walaaq ilaa ay ka  
nadiif noqonayaan.


Shan daqiiqo walaaq. Shan daqiiqana sug.

## 4. Ca



20 daqiiqo

Sug ilaa 20 daqiiqo.



Ha cabin hadday  
biyuhu hurdi yihiin.

Biyahaagu hadda cabitaan ayay diyaar u yihiin.  
Ha cabin hadday biyuhu hurdi yihiin.

## > Agabyada dheeraadka ah

### **Household Water Treatment Fact Sheet**

<http://www.lboro.ac.uk/well/resources/fact-sheet/fact-sheets-htm/Household%20WT.htm>

### **Field Water Quality Testing in Emergencies**

<http://www.lboro.ac.uk/well/resources/fact-sheets/fact-sheets-htm/WQ%20in%20emergencies.htm>

### **Hygiene promotion**

<http://www.ifrc.org/whhat/health/water/hygiene.asp>

### **Drinking Water Quality**

[http://www.who.int/water\\_sanitation\\_health/dwq/en/](http://www.who.int/water_sanitation_health/dwq/en/)

# Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas

---

Aadaminimo

Eexasho La'aan

Dhexdhexaadnimo

Madaxbanaani

Mutadawacnimo

Midnimo

Caalaminimo

Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas wuxuu horumariiyaa hawlaha samofal ee urur-qarameedyada u adeega dadyowga nugal.

Iyadoo ay isku Xiraan caawimooyinka masiibooyinka caalamiga ah iyo dhiirigalinta u kaalmayntooda, mar kasta wuxuu raadiyaa siduu uga hortagi lahaa una yarayn lahaa dhibaataada bani'aadamka.

Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas Urur Qarameedyada iyo Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Casi waxay isku yihiin Dhaqdhaqaaqa Caalmiga ah ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas.

## Daaweynta Biyaha Aqalka iyo Keydintooda

Buugan waxa loogu talagalay shaqaalaha iyo mutadawaciinta Bilaha Cas iyo Laanqayrta Cas ee ka jawaab bixinaya xaaladaha degdega ah ee la Xiriira dhibaatooyinka biyaha. Buugani wuxuu soo bandhigayaa arrimo dhawr oo lagu horumarinayoo tayada biyaha aqalka.

Qaybaha uu ka kooban yahay waxa ka mid ah:

- Guud ahaan tayada biyaha
- Sidaad u nadiifinayso biyaha aqalka
- Sidaad u ilaalinayso biyaha aqalka
- Sidaad u dooranayso qaabka haboon ee biyaha lagu horumarinayo
- Sidaad kor ugu qaadayso daaweynta biyaha aqalka iyo kaydintooda

Kadib marka shaqada la galo, dadka ka faa'iidayanaya hawshan waxay u baahan doonaan tababar siday u isticmaali lahaayeen qaababka gaarka ee daawada. Buugan waxa kale o ku jira xaashida xogta oo kooban taasoo loo qaybin karo mutadawaciinta si ay u isticmaalaan marka ay fulinayaan tababarada.

Wixii xog dheeraada, la xidhiidh Qaybta Biyaha iyo Nadaafadda,

Ururka Bisha Cas (Somali Red Crescent Society)

Xiriirka Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas



Telephone: +252 1021 6049

E-mail: [srcsnai@bishacas.org](mailto:srcsnai@bishacas.org)

Wixii xog dheeraada, fadlan booqo

websitkan: [www.bishacas-srcs.org](http://www.bishacas-srcs.org)